

SMITTSKYDDSBLAD

Patientinformation

MRSA

Översättning till somaliska

Version 2023-04-18

MRSA, macluumaadka bukaanka

Waa maxay sababta aan anigu u helay macluumaadkan?

Tijaabooyin lagaa qaaday ayaa waxay muujiyeen inaad leedahay bakteeriyo adkaysi (adkaysi badan) u leh antibiyootigga oo loogu yeero MRSA. Warqaddan macluumaadka ku qoran waxaad ka akhrisan kartaa warbixin dheeraad ah oo ku saabsan macnaha ay leedahay iyo waxa ay tahay inaad ka fikirto si aadan dadka kale u qaadsiiin.

Waa maxay MRSA?

MRSA macnaheedu waa meticillinresistent Staphylococcus aureus waana nooc ka mid ah bakteeriyada stafylokokk taas oo adkaysi u leh antibiyootigga qaarkeed.

MRSA waxay ku jiri kartaa maqaarka ama xuubabka jirka iyada oo aanu qofku u baahnayn inuu u jirrado waxaana qofka cudurka qaba loo yaqaanaa side. Sida bakteeriyada caadiga ah ee stafylokokker ayey MRSA iyaduna waxay mararka qaarkood keeni kartaa caabuq, sida caabuqyada nabarrada oo kale.

Bakteeriyada MRSA ma sababto caabuqyo ka badan ama ka khatarsan bakteeriyada caadiga ah ee stafylokokker, laakiin marka la daaweynayo nooc ka mid ah caabuqa waxaa loo baahan yahay in la isticmaalo noocyo gaar ah oo antibiyootig ah.

Sidee loo kala qaadaa MRSA?

MRSA waxa lagu kala qaadaa dadka dhexdooda inta badan taabashada maqaarka, tusaale ahaan gacmaha Bakteeriyadu waxay sidoo kale ku dhegi kartaa walxaha innagu xeeran, tusaale ahaan qalabka jimicsiga, oo halkaas ayey ka sii faafi kartaa.

Qofka sidaha cudurka MRSA marar dhif ah ayuun buu dadka kale qaadsiiya. Xaaladaha qaarkood xaddiga bakteeriyadu way korodhaa waxaana sidoo kale kordha khatarta ah inuu caabuqu faafo. Taas waxaa loo yaqaanaa xaalado halis u ah faafidda cudurka.

Xaaladaha halista u ah faafidda caabuqa waxay noqon karaan tusaale:

- caabuqyada maqaarka, sida nabarrada cuddurada ee caabuqay, meel dhiigaysa ama impetigo (busbus-doofaar)
- narbarro furan
- cambaar sii xumaatay ama dheecaan ka soo baxaya marinka dhegaha
- cudurrada maqaarka ee joogtada ah qaarkood
- Tuubooyin ama caloosha oo lafuro.

Qofku ma ka bogsan karaa MRSA?

MRSA isaga ayaa caadi ahaan iskii isaga taga. Waxay qaadan kartaa wakhti kala duwan, bilo ilaa sannado. Waxaad u baahan tahay inaad iska qaaddo tijaabo si aad u ogaato in bakteeriyadii kaa baxday. Takhtarka ka mas'uulka ah MRSA ayaa go'aaminaya marka la kaantaroolayo cuddurka iyo xeerarka aad u hogaansamayso ee hoos lagu qoray ee aan loo baahnayn markaa kadib Inta badan waa la joojiyaa baaritaannada marka aan bakteeriyada MRSA la helin marka la qaado laba tijaabo oo isku xiga ugu yaraan saddex bilood gudahood.

Maxaan ka fikiraa si aanan dadka kale u qaadsiin?

Tan ugu muhiimsan ee aad samayn kartaa waa inaad si taxadder leh u nadiifiso gacmaha. Haddii aadan ku jirin xaalado halis ah, waxaad u noolaan kartaa sidii caadiga ahayd waxaana markaa yaraada khatarta uu cuddurku ku faafayo.

Carruurta waxay aadi karaan xannaanada iyo iskuulka waxayna ka qayb qaadan karaan aktiifiteetyada dhammaantood. Dadka ka mas'uulka ah carruurta uma baahna inay ku wargeliyaan xannaanada iyo iskuulka inuu ilmuhu qabo cudurka MRSA. Carruurta dhigata xannaanadu waxay marmarka qaarkood u baahan yihiin inay guriga joogaan, hoos ka eeg xeerar ay tahay in qofka bukaanka ahi uu u hoggaansamo.

Haddii ay xirfaddaadu tahay inaad ka shaqayso xayawaanka, waxa dhici karta in lagu siiyo talooyin gaar ah. Takhtarkaagu wuxuu markaa la tashan karaa dhakhtarka xakamaynta cuddurrada faafa.

Waa xeerar ay tahay in qofka jirrani uu u hoggaansamo markuu cudurka qaado kadib

MRSA waa cudur si guud halis u ah sida uu dhigayo sharciga xakamaynta cudurrada faafa. Sidaa darteed waa inaad raacdaa xeerarka qaarkood ee uu dhakhtarkaagu ku siinayo, waa xeerar ay tahay in qofka bukaanka ahi uu u hoggaansamo:

- Haddii aad leedahay xaalad halis ah oo uu caabuqu ku faafayo, waa inaad raacdaa hababka nadaafadda gaarka ah ee hoos lagu sharraxay.
- Haddii aad leedahay caabuqa maqaarka oo hadda qabto, nabar furan ama canbaar uu dheecaan ka soconayo, markaa kama qayb qaadan kartid ciyaaraha ay jirka dadku istaabanayaan ama la isticmaalayo qolab si wadajir ah loogu tababaranayo ama jiimka.
- Carruurta xannaanada dhigata guriga ayey joogayaan haddii ay leeyihiin nabarro cudur oo caabuqay, impetigo (bus-bus doofaar) ama canbaar kugu sii xumaatay.
- Haddii aad hadda leedahay caabuqa maqaarka, nabar furan ama canbaar dheecaan ka socdo, waa inaad u sheegtaa inaad qabto cudurka MRSA marka jirka lagaa daloolinayo si biro laguugu xiro (piercing), jirka wax laguugu sawirayo (tatueering), masaajka, daryeelka cagaha ee aan daawaynta ahayn iyo daawaynta la midka ah ee maqaarka ama xuubabka jirka.
- Waa inaad sheegtaa in aad qabto cudurka MRSA marka lagu siinayo daryeelka caafimaadka, daryeelka ilkaha iyo daryeelka cagaha. Tani waxay sidoo kale khuseysaa haddii lagu siiyo daryeel caafimaad ama laguugu daryeelayo meel hoy ah ama gurigaba. Haddii aad hesho caawimo ku saabsan adeegga, nadaafada guriga, daawada oo lagu keeno ama bannaanka oo lagu soo lugaysiiyo, uma baahnid inaad u sheegto inaad qabto cudurka MRSA.
- Qofka ka shaqeeya ama ku jira waxbarsho ku saabsan daryeelka caafimaadka iyo daryeelka dadka, waa in aanu qofkaasi ka qayb qaadan shaqada daryeelka caafimaadka haddii dhakhtarkiisu qiimeeyo inuu leeyahay xaalado halis ah inuu cudurka faafi karo.
- Waa inaad la xiriirtaa dhakhtarkaaga oo aad u geysaa tijaabooyinka lagama maarmaanka ah.

Haddii lagu sameeyay xeer ay tahay inaad u hoggaansanto oo aad u aragto inuu khaldan yahay, waxaad la xiriiri kartaa takhtarka xakamaynta cudurrada faafa ee ku sugan gobolkaaga.

Nidaamyada nadaafadda gaarka ah ee khuseeya qofka leh xaalado halis ah

Haddii aad leedahay xaalado halis ah inaad faafiso caabuqa, markaa waxa kordhaya khatarta faafida caabuqa. Markaa waa inaad ka fikirtaa arrimaha soo socda:

- Xaqiiji inaad si fiican u dhaqdo gacmaha. Isticmaal shukumaan iyo alaabo musqul oo adiga kuu gaar ah.
- Ha kula dabaalan barkadaha wakhti ay dadka kale ku dabaalanayaan.
- Ku duub meelaha nabarrada ah faashado oo beddel faashaddaha haddii ay qoyaan.
- Haddii ay kugu xiran yihiin tuubooyin/kateeter, waa inaad gelisaa dharka hoostiisa.
- Dhaq gacmahaaga markaad taabato nabarro, dhaymo ama tuubooyinka kadib.

Raad-raacidida faafitaanka cudurka

Sida uu qabo sharciga xakaymnata cudurrada faafa, waa inaad ka qayb qaadataa raadinta ama baaridda caabuqa. Taas macnaheedu waa inaad bixiso macluumaad si shaqaalaha daryeelka caafimaadku ay u qiimeeyaan goorta, meesha iyo sida loo malaynayo inaad cudurka ku qaadday iyo haddii laga yaabo inaad dad kale qaadsiiyay.

Waxa aad sheegato waa sir (qarsoodi) dadka aad ka sheekayn doontaana ma ogaan doonaan qofka aad tahay.

Warqad ku saabsan ka hortagga cudurrada faafa

Warqadda ka hortagga cudurrada faafa waxaa soo saaray Ururka caafimaadka ka hortagga cudurrada faafa waxayna khuseeyaa heer qaran.